


# Unugyada Difaaca Jidhka Daawaynta



Nooca delta waa xaaladaha kordhaya ee COVID-19, ee ka yimaada jirooyin khatar ah, cusbitaal dhigid iyo dhimasho.

Daawaynada kooxda unugyada difaaca ee isku nooca ah (Monoclonal antibody) (mAb) waxay kaa caawin karaan kahortagga xanuunka daran, iyo waxay yareyaan culeyska saaran isbitaalladeena iyo nidaamyadeena caafimaadka.

Daaweyntan ayaa lagu heli karaa duris ahaan oo waxayna yareyna fudusaysaa in la qaado.

## Maxaan u qaadanaayaa tallaalka?



- Waxay yarayn kartaa cusbitaal dhigida ilaa 70% dadka qaba COVID ee hada sita astaamo degen ilaa dhexdhexaad.
- Waxay yaraysaa khatarta qaadista COVID-19 ilaa 81%, haddii qofku la daweyo ka dib cudur gaadhida.
- Waxay yaraysaa khatarta dhimashada.
- Waxaa la caddeeyay inay wax ka tarayso nooca fayraska Delta.

## Waa maxay unuga barootiinka jidhka difaaca?



Unugyada difaaca jidhka (mAbs) waa unugyada difaaca lagu sameeyay shaybaadhka ee ka xaniba fayrasku inuu soo galo unugyada.

## Kumaa u qalma daawaynta mAb?

Shakhsiyaadka 12 iyo ka wayn ee miisaankoodu yahay ugu yaraan 88 rodol (40 kg) kuwaas oo:

### 1. Oo laga helay COVID-19

- 10 maalmood gudahooda ku helaya astaamaha
- Qaba astaamaha degen ilaa dhexdhexaad ah
- Ah bukaan socod oo aan ahayn daawaynta ogsajiinta
- Oo looga fekero [bukanaada aadka u khatarta badan](#).

2. **Uu gaadhay COVID-19 ama khatar sare ugu jira cudur gaadhida** ay sababtay xaaladaha goobta dawaynta (sida guryaha kalkaaliska) IYO aan si buuxda loo tallaalin IYO looga fekero [khatar sare](#). Dadka si buuxda loo tallaalay sidoo kale waxaa looga fekeraa inay u qalmaan xaalado gaar ah.



## Sideen dib ugu heli karaa?



La xiriir bixiyahaaga daryeelka caafimaadka si aad wax badan u ogaato oo aad u raadiso haddii aad u qalanto daaweyntaan.